

Heshiiska Dhaqaalaha ee 2023

Waxaan fahmayaa inaan si buuxda oo toos ah masuul uga ahay NYFS si aan u baxsho qarashka adeegyada la siiyay ilmahayga ama aniga. NYFS ayaa aqbalaysa inay iga caawiso raadsashada gunnooyinkayga caymiska ee adeegyada la siiyay. Haddii shirkada caymisku aysan bixin qarashka, waxaan masuul ka ahay qarashka buuxa. Waxaan aqbalayaa inaan kusoo wareejiyo NYFS lacag kasta oo caymisku baxsho oo aan ku heli karo adeegyada la isiiyay. Haddii shirkadayda caymisku aysan bixin lacagta 60 maalmood gudahood kadib marka ay NYFS codsiga dirto, aniga ayaa masuul ka ah qarashka. Lacag kasta oo uusan caymisku bixin ayaa la iga rabaa xiliga balanta, ilaa inaan heshiis la galo maahee NYFS.

Waan fahmayaa qarashka ku cad qiimaha la iga rabo bil kasta. Haddii kaarka daynta ama kaarka HSA aan hanaankaan ku baxsho dhammaan xogta ayaa si amaan ah loo difaaci doonaa. Baaqiga lagu heshiiyay ayaa la iga jari doonaa markay tahay, ama ku dhowdahay, 1da ama 15ka bil kasta. Heshiisyada ee lacag bixinta ee la gaaray ayaa la samayn karaa.

Waxaan fahmayaa in NYFS ay adeegsan karto midkood wakaalada dayn uruurinta ama amarka maxkamada codsiyada fudud si ay u hesho lacagaha la dhaafay waqtigoodii 90 maalmood ama gaaraya \$500.00 ayadoo aan bixin lacagta ama heshiis lacag bixin la gaarin, dhammaan qarashaadka dacwada sharcigana waxaa laga rabaa macmiilka.

Qarashka Adeegga Caafimaadka

Qiimeyaasha lagu heshiisyay sanadkaan ayaa hoos ku qoran:

Dhkhtarka dhimirka oo ruqsad leh, shaqaalaha bulshada, baxnaaniyaha guurka iyo qoyska, la taliyaha xirfada iyo tababartaha:

Balanta diiwaan gelinta _____	\$250.00
Baxnaaninta shaqsiga ah (16-37 daqiiqo) _____	\$115.00
Baxnaaninta shaqsiga ah (38-52 daqiiqo) _____	\$150.00
Baxnaaninta shaqsiga ah (53+ daqiiqo) _____	\$214.00
Baxnaaninta qoyska (bukaanku ku jiro) _____	\$170.00
Baxnaaninta qoyska (bukaanku uusan ku jirin) _____	\$151.00
Kulanka kooxda	\$75.00

Adeegyada baxnaaninta dhimirka

Diiwaan gelinta caafimaadka dhimirka _____	\$420.00
Dabagalka baxnaaninta dhimirka (40 daqiiqo) _____	\$250.00
Dabagalka baxnaaninta dhimirka (25 daqiiqo) _____	\$170.00
Qaybta aan ka bixinaayo caymiska booqasho kasta \$ _____ (ama baaqiga kadib qaybta caymiska)	

Bixinta Gunnooyinka

Waxaan halkaan ka fasaxayaa in toos loo siiyo lacagta Adeegyada Dhalinta iyo Qoyska ee Waqooyi Bari gunnooyin kasta oo aan ku heli lahaa adeegyada uu i siiyay baxnaaniyaha ama dhakhtarka dhimirka ee la shaqeeya Adeegyada Dhalinta iyo Qoyska ee Waqooyi Bari.

Faafinta Xogta Caafimaadka

Waxaan halkaan uga fasaxayaa Adeegyada Dhalinta iyo Qoyska ee Waqooyi Bari inay siiso diiwaanayda shirkadayda caymiska si ay ugu adeegsato ka shaqaynta codsiyadayda caymiska. Ogolaanshahaan ayaa sii shaqayn doona ilaa inta qarashaadka loo dirayso s caymisku uga jawaabo codsigayga ama ilaa inta qarash bixiyuhu codsanaayo.

Macluumaadka Xiriirka

Adeegyada Dhalinta iyo Qoyska ee Waqooyi Bari waxay u aqoonsan tahay ciwaankaaga iimeelka iyo xogta kale ee xariirta mid sir ah umana sheegi doonto cid ka baxsan wakaaladaha, ayna ku jiraan xiriirada iimeelka ee u dhexeeya macmiilka iyo dhakhtarka. Waxaad masuul ka tahay u sheegista NYFS haddii xogtaada deegaanku isbadesho inta lagu jiro mudada aad adeegyada ka helayso NYFS.

Magaca Qoran

Taariikhda

Saxiixa Bukaanka ama Wakiilka Gaarka ah

Xiriirka Wakiilka